



Ref:.....

الرقم:.....

Date:.....

التاريخ:.....

Muqdisho
Apr. 14, 2007

**SHARCI-NIMADA CIIDAMADA ITOOBIYA EE
DALKA JOOGA
(BAARIS QAAMUNI AH).**

- Markii aan fiirannay qeybta lixaad ee dustuurka lagu soo sameeyay dalka Kenya, laguna soo dhisay Dowladda Federaalka, kaas oo ka hadlaaya qaab dhismeedka iyo nidaamka dowladda **GOLAHA SHACABKA**, Qodobka 33aad (waajibaadka golaha shacabka).
- Markii aan fiirinnay Qeybta todobaad ee ku saabsan **MADAXWEYNaha** Qodobka 44aad (waajibaadka madaxweynaha).
- Markii aan fiirinnay Qeybta sideedaad ee ku saabsan xubinta **FULINTA** ama **XUKUUMADDA**. Qodobka 48aad (waajibaadka wasiirka laad) iyo Qodobka 53aad (xilka golaha wasiirada)
- Markii aan daraasad ku sameynay Qawaaniinta jamhuuriyadda,

WAXAA INOO SOO BAXAY:

- 1- In cidda kali ah ee leh in ay soo saarto sharci loogu yeeranayo ciidan shisheeye ay tahay Baarlamaanka, maadaama ay waa jibaadkiisa ku jirto dajinta qawaaniinta, fiiri (xarafka C ee faqrada laad, ee qodobka 33aad), Ciidanka uu dalban karaana waa mid ku socda Sharciyadda Umadaha Midoobay UN, kuna shaqeyya tilmaaha Dowladda Soomaaliyeed iyo awooddecda, ama Kan Umadaha Midoobay UNka, lehna Mandate Xaddidan oo aan laga gudbi karin, waxna u dhimeyn Madax Bannaanida.
- 2- Madaxweynaha, golaha Wasiirada, iyo Wasiirka laad (Raiisul Wasaaraha), Midkoodna uma yeeri karo Ciidan shisheeye ee aanu Baarlamaanku ansixin, hadii uu u yeerana waa Gef Dustuuri ah, ayna tahay in Maxkamad lagu saaro, gaar ahaan haddii Ciidankaasi uu khasaare (Naf, Maal, ama Sharaf) u geysto muwaadinka.



Ref:.....

الرقم:.....

Date:.....

التاريخ:.....

- 3- Haddii Ciidankaasi ka boxo awoodda iyo siyaasada ay ku shaqeyneyso Dowladdu, kana amar qaato Caasimadda Dalkii laga soo diray, Ciidankaasu wuxuu noqonayaa mid qabsaday Dalka, meeshana ka saaray madax bannaanidii Qaranka, taas oo ah mid kasoo horjeeda qodobada ugu muhiimsan dastuurka ee ka hadlaaya madaxbanaanida (qeybta laad Siyaadada iyo Dhulka), Ciddii horseeda soo galitaankoodana waxey noqoneysaa mid cadowga ku taageertay ku xad gudubka Madax banaanida Qaranka, waxaana lagu qaadayaa qodobka 184 ee xeerka ciqaabta (Isku day ka dhan ah madax bannaanida qaranka, ama midnimada Dalka).

Marka la eego Ciidamada Itoobiya ee Dalka ku jira, waxaa inoo soo baxaaya:

- A. In eysan Ciidamadaasi ku imaan Qaraar uu soo saaray Baarlamaanka Jamhuuriyadda Soomaaliya, Ciidamada Uganda ayaa lagu tilmaami karaa in ay ku joogaan Qaraarkii Baarlamaanka.
- B. In Ciidankaasi uusan ku shaqeyn Tilmaamaha Dowladda Soomaaliya, Balse ay ku shaqeyaan Fulinta siyaasadaha Addis Ababa, ee ku wajahan Soomaaliya.
- C. In uusan wax haba yaraatee Sharciyad ah ka heysan ururka Umadaha Midoobay UNka, kuna shaqeyn xeerarka caalamiga ah ee Qaanuunka Adduunka.
- D. In uu xasuuq iyo burburin hantida qaranka, iyo Shacabka Soomaaliyeed u geystay, isla markaana bara kiciyay shacabka Soomaaliyeed, Madaafiic, taangi, iyo Diyuuradana ku duqeeyay Shacab maati ah iyo Caasimadii Dalka, saasna ku geystay xad gudubyo ka dhan ah Bina aadmi nimada iyo Madax banaanida qaranka Soomaaliyeed.



Ref:.....

الرقم:.....

Date:.....

التاريخ:.....

Sidaas darteed, Ciidankaasi waa Ciidan Cadow ah, oo kusoo duulay qaranka Soomaaliyeed, Meel uu sharciyad ka heystana aysan jirin. Ummadana waxaa ku waajib ah in ay ka hortagaan iskana caabiyaan Cadowga kusoo duulay, meelna uga soo wada jeestaan, kana tanaasulaan khilaafaadka dhexdooda ah.

Cidda isku tilmaamtay in ay Ciidankaas u horseeday soo galista Dalkana, waa khaa'inul wadan, Ciqaabka uu lecyahayna waa in dil toogasho ah lagula fuliyaa meel fagaare ah.

Cidda leh amarka ka tallaabidda sharci darada ah ee Ciidankaasi uga tallaabay xuduudda Caalamiga ah, iyo xasuuqa uu geystay, waa in lagu soo oogaa dambiyo Dagaal, lana horkeena Maxkamadda Adduunka, laguna qaadaa wixii ciqaab ah ee ka dhashay fal danbiyeedka Ciidankaas.

Umadaha Midoobay, iyo Xogyaheyeeda Guud waxaa laga doonayaa in ay ilaaliyaan Heshiisyada iyo Xeerarka Caalamiga ah ee saldhigga uu u yahay ilaalinta iyo dhowrista Amniga iyo Nabad gelyada Caalamka, Dhowrista madaxbannaanida Qarameed ee waddamada Caalamka. Lagana qaado waxa manta Soomaaliya ka socda tillaabooyin degdeg ah, haddii sharciga adduunku shaqeynayo.

AGAASIMAHA JAMCIYADA

Dr. FAARAX CABDULLAAHI MACALLIN

